

Macluumaadka ku saabsan ACCESS ee ACCESS

Waa maxay ACCESS ee ELLs?



GELITAANKA ELLs (ACCESS) waa qiimayn lagu cabbiro aqoonta luqadda Ingiriisiga xagga dhegeysiga, akhrinta, ku hadalka, iyo qoraalka sida lagu qeexay heerarka Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga ee WIDA. Heerarkan waxaa qaatay Minnesota oo wax ka qabta baahida luqadda ee heerarka nuxurka akadeemiyadeed ee gobolka.

Yaa samaynaya ACCESS?




Dhammaan bartayaasha Ingiriisiga ee ka diiwaangashan fasallada K-12 ee dugsiyada dadweynaha ee Minnesota ayaa samaynaya ACCESS. Ardayda qaar ee leh Qorshaha Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) oo buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka gaarka ah waxay qaadan karaan ACCESS Beddelkeeda.

Maxay ardaydu u qaataan ACCESS?



ACCESS waxay ardayda siisaa fursad ay ku muujiyaan xirfadaha luqadda Ingiriisiga ee ay ku baranayeen kuna nakhtiiminayeen fasalka dhexdiisa. Macallimiintu waxay u isticmaali karaan natiijooyinka si ay ugu wargeliyaan go'aamada ku saabsan horumarinta luqadda shakhsi ahaaneed iyo taageerada iyo si loo go'aamiyo u-qalmitaanka joogtada ah ee adeegyada bartayaasha Ingiriisiga. Dugsiyadu waxay u isticmaali karaan natiijooyinka si ay uga caawiyaan la socodka guushooda si ay u daboolaan baahiyaha bartayaasha ee luqadaha badan.

Goormee ayuu ACCESS dhacayaa?



ACCESS waxa la qaataa sanad walba ilaa ardaygu ka baxayo barnaamijkooda tacliinta waxbarida luuqada. Imtixaanka waxaa la qabtaa dabayaaqada Jannaayo ilaa dhammaadka Maarso.

Sidee ardaydu u sameeyaan ACCESS?



Inta badan ardayda waxay ku samayn doonaan ACCESS onleenka. Ardayda xanaanada waxay si gaar ah ula samaynayaan qiimaynta macalin. Ardayda qaar, iyadoo lagu salaynayo baahiyahooda ku qoran IEP ama qorshahooda 504, waxay ku samayn karaan qiimaynta warqad.